



Federal Republic of Somalia

Federal Parliament

The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS

Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8 ^{aad}	Kulankiisa: 7 ^{aad}
Taariikhda: 19/09/2026	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:22AM	Saacadda uu Xirmay: 12:28 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare.	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: Wasiir Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda XJFS Marwo Raaxo Maxamud Janaqoow oo uu wehliyo Agaasimaha Guud Ee Dakhliga Wasaaradda Maaliyadda XJFS. Mudane Faysal Maxamed Xaashi.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 2aad ee Hindise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga.

Furitaanka Kulanka:

Senator Xasan Xuseen Xaaji ayaa akhriyey Aayadaha Qur'aanka ee kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendayaasha kulanka, codayntii ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator

Ka aamustay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Senator Cabdi Axmed Dhuxulow (Dhagdheer) si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta akhrinta 2aad Hinsise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga. Warbixinta kadib, 4 Senator ayaa dood iyo su'aalo ka yeeshay Hinsise Xeereedka. Intaas kaddib, Agaasimaha Guud ee Dakhliga Wasaaradda Maaliyadda XJFS Mudane Faysal Maxamed Xaashi, ayaa ka jawaabay dhammaan su'aalihii ay Xubnaha Golaha Aqalka Sare ka weydiiyeen Hinsise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa faray Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska in ay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **12:28 PM.**

=DHAMMAAD=